



Ku: Waalidka

Tixraacayaga: 2024/58642-3

Kiis-haye: Marit Eikeskog

Taariikh: 26. apríl 2024

**Lama shaacin karo: Xeerka shaacinta §13,  
Xeerka maammulka § 13.1**

## GOOBAHA FASAXA XAGAAGA EE 2024 – Warbixin ku socota waalidka

Goobaha fasaxa xagaaga ee degmada Bergen ee ardayda dhigata fasallada 2. aad – 7aad. ee aysan suurtagalka u ahayn inay fasax u baxaan xagaaga inta iskoolku xiran yahay. Ujeeddada goobaha fasaxa xagaagu waa inay ardaydu helaan fasax iyo waxyaalo fasaxa la qabto ayagoo ammaankoodu sugan yahay. Dad waaweyn ayaa mas'uul ka ah oo maalin iyo habeen ba la jooga. Firfircooni iyo waxyaalo badan oo xiiso leh oo ardayda ku habboon ayaa ka dhaca goobaha fasaxa xagaaga.

Goobaha fasaxa xagaagu waa bilaash.

### Iskoolka ayaad ka helaysaa foomka codsiga

Ardayda doonaya inay tagaan goobaha fasaxa xagaaga, iskoolka ayay ka heli karaan foomka codsiga. Waad sheegan kartaa wakhtiga iyo meesha aad doonayso inaad tagto fasaxa xagaaga, laakiin ma ballanqaadi karno inaad heli doonto meesha aad doonayso.

### Wakhtiga iyo goobaha fasaxa xagaaga ee 2024

- Bømlo folkehøgskule iyo Folgefonn gjestetun, Jondal – **laga billaabo 24. juun ilaa 5. luuliyo**
- Bømlo folkehøgskule iyo Folgefonn gjestetun, Jondal – **laga billaabo 8. luuliyo ilaa 19. luuliyo**
- Bømlo folkehøgskule iyo Folgefonn gjestetun, Jondal – **laga billaabo 22. luuliyo ilaa 2. ogoosto** (warbixin intaan ka badan waxaad ka helaysaa foomka codsiga).

Goobaha fasaxa xagaagu waxay u kala qaybsan yihiin da'da ardayda. Goobaha qaar waxaa loogu tala galay ardayda fasalka labaad ilaa fasalka afraad, meesha qaar kale loogu tala galay ardayda fasalka shanaad ilaa fasalka toddobaad. 30 ilaa 50 arday ayaa goobtiiba joogta.

### Waxyaalo kale:

- Goobaha fasaxa xagaaga waxaa loogu tala galay ardayda uu ciwaankooda rasmiga ah yahay degmada Bergen.
- Ardayda dhigata fasalka 1-aad ma codsan karaan boos.
- Degmada Bergen caymiska shilalka ayay ardayda gelisaa.
- Haddii aad doonaysaan inaad caymis gelisaan dhar ama qalab kale oo ardaydu sitaan, waa inaad gaarkiinna u gashaan oo lacagta bixisaan.
- Waalidku waa inay Bergen joogaan haddii ay dhacdo inuu ilmuhu guriga soo aado inta goobta xagaaga la joogo.
- Jawaab qoraal ah ayaa loo soo dirayaa ardayda hesha booska goobta fasaxa xagaaga.

**Muddada kama danbaysta ah ee codsiga**

Si fiican u buuxi foomka codsiga, oo iskoolka keen. Waxaa codsiga la soo xarayn karaa ugu danbayn isniinta 13-ka maajo 2024.

Mahadsanidiin

BEHO – Shaqaalaha Agaasimaha degmada

Marit Hagevik – Madaxa qaybta

Marit Eikeskog – La-taliso

*Elegtaroonig ahaan ayaa warqadda loo aqbalay.*